HERITAGE INSTITUTE

# CADDAALADDA KUMEELGAARKA AH EE KU SALAYSAN BULSHOOYINKA QABIILIGA AH

## GOOBTA DARAASADDA – SOOMAALIYA

Janaayo 2024



# Tusmada


1 | Hordhac 4

2 | Dhigaallada ku saabsan asalka iyo sifooyinka Caddaladda Xilliga Kalaguurka ah, marka loo eego bulshooyinka qabiiliga ah 7

3 | Caddaladda Xilliga Kalaguurka ah iyo Sida loola Akhriyayo Xaaladda Soomaaliya 14

4 | Gunaanadka 19

5 | Talabixinno 25

6 | Tixraacyo 28

## Ku Saabsan Qoraaga

**Yuusuf Xasan,** waa cilmibaare xirfado kala duwan leh, kaas oo ku takhasusay dhaqaalaha, siyaasadda iyo taariikhda Afrika iyo Bariga Dhexe. Waxa uu darajada kowaad (B.A) iyo ta labaad (M.A) ka diyaariyay Jaamacadaha Harvard iyo Columbia, isaga oo ku sii takhasusay Casriyaynta Hay'adaha Bariga Dhexe. Hiigsigiisa tacliimeed waxa kaabaya doorarka xirfadeed ee ay ka mid yihiin in uu bare iyo kalkaaliye cilmibaariseed ka yahay jaamacadda Harvard, iyo sida oo kale in uu la taliye siyaasadeed u yahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage, iyo in uu cilmibaarista kula jaal yahay labada jaamacadood ee Columbia iyo California, Irvine.

**Xuquuqda daabacaaddan © 2024 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute 2024.**

# 1. Hordhac

## 1.1. Sooyaalka

Kadib tobannaan sano oo dagaallo sokeeye ka socdeen, Soomaaliya haatan waxa ay kaabiga u saarantahay marxalad soo kabasho. Gees kasta oo nolosha ah, astaamo muujinaya soo raysasho ayaa laga dheehan karaa – laga bilaabo nabadgelyo ku baahday qaybo badan oo deegaannada dalka ka mid ah, dibudhiska hay'adaha dowladnimada oo si tartiib tartiib ah u socda, iyo qaybaha kala duwan ee bulshada oo isu kaashanaya sidii ay u socodsiin lahaayeen mashaariic ay ku dhisayaan kaabayaasha magaalooyinkooda.

Si kastaba ha aahaatee, walow ay jiraan horumarradaas naruurada lihi, haddana halis weyn ayaa ku gadaaman jidka ay Soomaaliya u marayso dibudhiska dowladnimada. Xasaradaha ka oogan qabaa'ilka dhexdooda iyo fikirka xagjirka diineed, ayaa waddanka weli dhex qaadaaya; kooxaha siyaasaddduna si aan ka la joogsi lahayn ayay ugu fooganyihiin loollan awoodeed oo aan dhammaad lahayn, kaas oo halis ku ah rejada waddanka oo ah mid weli nugul. Xaaladdaas gebidhaclaynaya ayaa waddanka ka dhigaysa mid baaxaadegaya, oo horukac iyo dibudhac ku dhex wareegaaya. Dhibaatadaasi waa mid ka dhalatay cillad aasaasi ah oo ku jirta sida loo qaabeeyay nidaamka siyaasiga ah ee waddanka, kaas oo xoogga saaraya awood-qaybsiga siyaasadeed, islamarkaana dhayalsanaya in dibuheshiisiin buuxda laga dhex dhaliyo bulshada Soomaaliya.

Sidaas darteed, waxa lagama maarmaan ah in jihada loo socdo la beddelo, si loo adkeeyo hannaanka waddanku ugu aayo marxaladda dib u soo kabashada iyo xasilloonida. Waxa loo baahanyahay in dalku ka koro halbeegga xaddidan ee lagu eegaayo awood-qaybsiga, taas beddelkeeda, waa in mudnaanta la siiyo dibuheshiisiin bulsho oo dhab ah, maxaa yeelay waa arrin ma dhaafaan ah oo si walba muhiimad weyn u leh. Marka taas la eego, waxa hubaal ah in hannaanka dibuheshiisiin oo dhamaystirani ka mid yahay tiirarka ugu waaweyn uguna muhiimadda culus marxalahadaha Caddaaladda ku salaysan qabaa'ilka, taas oo u gaar ah duruufaha Soomaaliya, isla markaana ummadda Soomaaliyeed ka caawinaysa ka soo kabashada dhaawacyadii ka soo gaaray xasaradihii iyo xadgudubyadii wadddanka ka dhacayay muddada aadka u dheer.

Caddaladda Kumeelgaarka ahi, waxa ay dhiirrigalinaysaa dhaqan islaxisaabtan, waxaanay kaabaysaa xariirkii kalsoonida iyo is aaminaadda bulshada oo go'ay, iyada oo kobcinaysa dareenka waddaninimada oo ah wax bulshadu wadaagto. Haddii si miiggan loo waajaho saamaynta duruufihii la soo maray, waxa dhici karta in ay Soomaaliya beegsato ama ku hirato mustaqbal ku qotoma caddaalad, sinnaan, iyo is ogolaansho bulsho. Dadaalkani waxa uu ku qotomaa rabitaanka bulsho oo wadajir ah, taas oo ay dhab uga go'antahay in la waajaho saamaynta raadadkii laga dhaxlay xasaradihii wakhtigii tegay, si seeska loogu dhigo mustaqbal nabdoon oo xasilooni leh.

Warbixintani waxa ay eegaysaa suurtagalnimada sidii Soomaaliya looga dhaqan gelin lahaa Caddaladda Kumeelgaarka ah; waxaanay baaritaan ku samaynaysaa hannaankan cadaaladeed iyo marxaladaha uu taariikh ahaan soo maray, iyada oo ka dhimbiilqaadanaysa khibradaha ka soo baxay dalal kale oo Afrikaan ah, kuwaas laga dhaqangaliyay Caddaladda Kumeelgaarka ah. Iyada oo la falanqaynayo waayo-aragnimada laga dhaxlay waddamada habkan oo kale soo maray ee la duruufta ah Soomaaliya, waxa daraasaddan looga golleeyahay in la falkiyo qaab ku haboon xaaladda bulsheed, siyaasadeed, iyo tan taariikheed ee gaarka u ah qaabdhismeedka Soomaaliya.

## 1.2 - Ujeeddooyinka iyo Su'aalaha Cilmibaarista

Cilmibaaristan ayaa falanqaynaysa rejada laga malaysan karo in Caddaladda Kumeelgaarka ah ka hirgasho Soomaaliya, si loo gaaro waxyaabahan soo socda:

I. Iyada oo la adeegsanaayo casharrada iyo waayo-aragnimada laga dhaxlay duruufta Soomaaliya iyo waddamada la midka ah, waa in wax lagu biiriyo doodaha ku saabsan doorka Caddaladda Kumeelgaarka ah, ee khusaysa bulshooyinka ku jira marxaladda ku xigta colaadaha sokeeye;

II. Kor u qaadista fahamka waxyaabaha gacan ka gaysta hurinta xasaradaha iyo xadgudubyada xuquuqda aadanaha, taas oo lagama maarmaan u ah sidii loo qaabayn lahaa farsamooyinka mihiimka u ah hannaan Caddaladda Kumeelgaarka ah ee ku salaysan duruufta Soomaaliya;

III. Qiimaynta isku dayada hadda jira iyo kuwii hore ee lagu doonaayay caddalaad bulsho, iyada oo la qiimaynaayo dadaalladaas mid kasta oo ka mid ahi waxa uu ku wacnaa iyo waxa uu ku liittay, taas oo looga faa'iidaysanayo qaabaynta istraatijiyadeed ee cusub,taas oo si ka wacan sidii hore u maaraynaysa xadgudubyadii hore, isla markaana caawinaysa nabad waarta; iyo,

IV. In dareenka daneeyayaasha iyo kan bulshada caalamkaba lagu soo jeediyo muhiimadda ay leedahay waxkaqabashada xadgudubyada dhacay, in la abuuro rabitaan siyaasadeed oo ujeeddadan u adeegaaya, in la abaabulo helitaanka dhaqaale lagu hirgelin karo caddaalad bulsho, iyo in kor loo qaado islaxisaabtan ku saabsan meelmarinta dadaallada Caddaladda Kumeelgaarka ah.

Warbixintani waxa ay isku deyaysaa in ay jawaab u hesho weydiinta cilmibaaristan tiirdhexaadka u ah – Sidee ayay dadka Soomaaliyeed u maarayn karaan dhaxalka dembiyadii iyo xadgudubyadii soo dhacay? Si aan weydiintaas uga warcelino, afar weydiimood oo kale ayaan halkan kaga doodaynaa, kuwaas oo ka la ah:

I. Sidee ayay bulshooyinka qabiiliga ah ee Afrika u xaqiijiyeen Caddaladda Kumeelgaarka ah, maxay se yihiin casharrada aynnu ka baran karno waayo-aragnimadooda?

II. Maxay yihiin astaamaha waaweyn ee dabciga u ah hab-dhaqanka nidaamka qabiiliga ah ee Soomaaliya, sidee ayuu se nidaamkaasi uga qayb qaatay hurintii xasaradaha iyo colaadihii sokeeye?

III. Marka loo eego xaaladda Soomaaliya, waa maxay fursadaha iyo caqabadaha ku gadaamand hirgelinta Caddaladda Kumeelgaarka ah?

IV. Waa maxay talooyinka ku habboon in siyaasad ku saabsan meelmarinta Caddaladda Kumeelgaarka ahi ka dhaqangasho Soomaaliya?

## 1.3. Habraaca Cilmibaarista

Si doodda cilmibaaristan loo sii xoojiyo, waxa ay warbixintani dib-u-eegis ku samaynaysaa xogaha muhiimka u ah Caddaaladda Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya, iyada oo la adeegsanaayo habab kala geddisan, isla markaana la soo qaadanaayo mabaadiida qaybaha kala duwan ee culuumta jirta, sida taariikhda, dad-barashada(antarabolojiga) iyo raadraaca aragtiyaha (naratoolojiga). Xogihii laga soo dhiraandhirriyay dib-u-eegistii lagu sameeyay dhigaalka cilmiga iyo diiwaannada xogaha ee mawduucan ku saabsan, waxa la soo hor dhigay koox khubaro ah oo loo qabtay kulan aqoon-isweydaarsi ah, si ay u ansixiyaan natiijada soo baxday, talooyinkoodiina waxa lagu daray xog-ururintii cilmibaaristan.

## 1.4. Qaabdhismeedka Warbixinta

Warbixintani waxa ay ka koobantahay shan qaybood oo waaweyn, oo kala ah:

I. Qaybta u horraysaa waa hordhac guud, oo ku saabsan sawir guud oo muujinaaya sooyaalka guud ee xaalka caddaaladda Soomaaliya, iyo sida oo kale hadafyada laga leeyahay warbixintan iyo habraaca loo maray cilmibaaristan.

II. Qaybta labaad waxa ay muujinaysaa asalka, sifooyinka, iyo arrimaha muhiimka u ah Caddaladda Kumeelgaarka ah, iyada oo la raacaayo sida ay u qeexeen aqoonyahanno iyo daneeyayaal kala duwani.

III. Waxa ku xigta, warbixin guud oo ku saabsan xaaladda Soomaaliya iyo Caddaladda Kumeelgaarka ah; iyada oo qaybtan diiradda lagu saaraayo waayaha dhaqan-dhaqameed iyo kuwa siyaasadeed ee dalka, hab-dhaqanka qabiiliga ah ee ku salaysan dibuheshiisiinta, iyada oo la adeegsanayo sheekooyinka ku saabsan dadaalladii hore ee nabadaynta intoodii guulaysatay, waxaana looga golleeyahay in dadka deegaanka iyo hoggaannadooda lagu qanciyo kaqaybqaadashada hannaanka Caddaladda Kumeelgaarka ah. Sida oo kale, qaybtani waxa ay ilayska ku shidi doontaa caqabadaha saamaynta ku leh dadaallada Caddaladda Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya.

IV. Qaybta warbixintan u dambaysa ayaa soo bandhigaysa natiijooyinkii cilmibaaristan ka dhashay, iyada oo soo jeedin doonta talooyin ku saabsan hindisayaasha Caddaladda Kumeelgaarka ah ee mustaqbalka Soomaaliya iyo dadyowga la midka ah ee noloshoodu ku salaysantahay habka qabiiliga ah.

# 2. Dhigaallada ku saabsan asalka iyo sifooyinka Caddaladda Kumeelgaarka ah, marka loo eego bulshooyinka qabiiliga ah

## 2.1. Qeexitaannada Caddaladda Kumeelgaarka ah

Hannaanka loo yaqaanno ‘Caddaladda Kumeelgaarka ah’, ayaa qayb ka ah hababka loo adeegsado xallinta isku dhacyada bulshooyinka, gaar ahaan kuwa la daalaadhacaya xalalka xasaradaha hubaysan iyo saamaynta kalitaliska. Taasi waa marxalad muhiimaddeeda leh, oo astaan u ah xaaladaha soo kabashada iyo ka gudbitaanka colaadaha. Sannadkii 2004, ayaa warbixin uu soo saaray Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, lagu sheegay in Caddaladda Kumeelgaarka ahi tahay nidaam iyo geeddi-socod ka turjumaya isku day bulsho, oo ujeedkiisu yahay in laga bogsado saamaynta xadgudubyadii hore u dhacay, kuwaas oo loogu gudbayo hirgelinta nidaam ku dhisan islaxisaabtan, caddaalad, iyo dibuheshiisiin dhab ah. Marka loo eego qeexitaankan, Caddaladda Kumeelgaarka ah fulinteeda waxa loo adeegsan karaa nidaamyada garsoorka iyo kuwa garsoorka ka baxsan labadaba, iyada oo ay dhici karto in bulshadu caalamku qayb ka noqoto ama aanay ka noqon. Haddaba, iyada oo habkan la raacayo, waxa suuragal ah in shakhsiyo cayiman la maxkamadeeyo, la bixiyo magdhow ku saabsan khasaaraha la geystay, runta oo la raadiyo lana shaciyo, dibuhabayn lagu sameeyo hay’adaha dowladda, iyo talaabooyin kale oo wada jira, kuwaas oo ujeedadaas darted loo gu dhaqaaqo (Secretary-General, 2004).

Caroli (2022), ayaa si guud u qeexay hannaanka Caddaladda Kumeelgaarka ah, isaga oo ku micneeyay xal loo adeegsado soo afmeeridda saamaynta xadgudubyadii dhacay. Inkasta, oo sida uu qabo Teitel (2015), ereyga 'kumeelgaar' si toos ah u tilmaamayo isbeddel kalitalis, haddana ereygu waxa uu leeyahay micno intaas aad uga sal ballaaran, waxaana ku jira isbedello siyaasadeed, oo ay qayb ka tahay in garsoorka loo adeegsado la tacaalidda xadgudubyadii ay ku kaceen masuuliyintii burcadda ahaa ee taliskii hore. Dersso (2017), ayaa isagu waxa uu qoray in hannaanka Caddaladda Kumeelgaarka ahi yahay gaadiid loo adeegsado sidii bulshooyinka ku jira xaalad colaadeed loogu rari lahaa xaalad nabadeed, ama waa sidii nidaam kelitalis ah loogu rari lahaa nidaam dimiquraadi ah, sida oo kale waa in hannaankan laftiisa loo adeegsado maaraynta marxaladda danbaysa dagaallada, haddii ay tahay colaado bulsheed iyo haddii ay tahay talis macangag ah oo dibuhabayn lagu samaynaayo.

Matandela (2020) ayaa isna ku dooday in Caddaladda Kumeelgaarka ahi tahay aalad loo adeegsado kor u qaadista xuquuqda aadanaha, caddaaladda, nabadda, dowlad-wanaagga iyo horumarka Afrika. Caddaladda Kumeelgaarka ah ayaa Afrika ku leh taariikh wacan oo xusid mudan, wallow aanu hannaankani wax tixraac ah ku lahayn nidaam-dowladeedka ku dhisan dimuqraadiyadda iyo fikirka xorta ah (liberal democracy) iyo nidaamkeeda garsoorka toona. Iyada oo ay taasi jirto, ayay haddana hababka caddaaladdu yihiin nidaamyo soo dhex gala hubinta in aan dib loogu noqon colaadihii hubaysnaa, sida oo kale waxa ay gacan ka gaystaan ka bogsashada dhaawacyadii addoonsiga, isticmaarka, midab-takoorka, cabudhinta kalitalisyada iyo dagaallada sokeeye; iyada oo la adeegsanayo luuqad xerudhalan ah oo la isla wada fahmi karo, iyada oo la xoojinayo xuquuqda aadanaha iyo hababka islaxisaabtanka bulshada.

## 2.2. Barbilowga iyo Sifooyinka Caddaladda Kumeelgaarka ah;

Sida uu sheegay Teitel (2005), waxa jira saddex heer oo ay soo martay Caddaladda Kumeelgaarka ahi. Tan kowaad, waxa ay ahayd dacwaddii Nuremberg iyo xeerarkii caalamiga ahaa ee ku habboonaa Naasiyiintii Jarmalka kadib Dagaal-weynihii 2-aad ee dunida. Maxakamadayntii Nuremberg waxa ay ku qotontay laba fikradood, (B), Kuwii dembiyada galay in la la xisaabtamo, laguna khasbo in ay qaataan khasaarihii ay geysteen, taas oo lagama maarmaan u ahayd bulshooyinku in ay ka guuraan dabasocodka talisyadii dimuquraadiga u muuqday, balase hoosta ka ahaa kelitaliska; iyo (T), in bulshada caalamku diiddo falalka nidaamyadaasi ku kaceen ee foosha xun. (Somali Stability Fund, 2021). Sida oo kale, fikradda Caddaladda Kumeelgaarka ahi waxa ay bilow u ahayd soo ifbaxa hannaanka calamiga ah ee xuquuqda aadanaha.

Wejiga labaad ee Caddaladda Kumeelgaarka ahi waxa uu qayb ka ahaa isbeddelladii juquraafi-siyaasadeedka ee waayadii dagaalka qabow. Waxa jiray mawjado isbeddello dimuquraadiyadeed ah oo ka curtay Koonfurta Qaaradda Maraykan (Latin America) iyo Afrika, halka Bariga Yurub iyo waddamada Badhtamaha Aasiya na ay u soo tagnaayeen kala daadashadii Midowgii Soofiyeed. Isbeddelladaasi waxa ay horseedeen baaqyo soo cusboonaaday oo lagu doonaayay in wax lagaga qabto caddaalad-darrooyinkii hore u dhacay.

Si ka geddisan maxkamadayntii Nuremberg ee Naasiyiinta, markan Caddaladda Kumeelgaarka ahi waxa ay culayska saartay meelmarinta caddaalad ku qotonta daawaynta iyo xal u raadinta xadgudubyadii dhacay, waxaanay ka tagtay hannaankii ciqaab-marinta ku koobnaa, iyada oo caddaalad-raadinta lagu soo kordhiyay laba qaybood oo kala ah iscafis guud, iyo ka run-sheegista wixii dhacay. Intaas waxa dheeraa, in Caddaladda Kumeelgaarka ahi ay waayadaas ku suntanayd meelmarinta hannaan lagu aqoonsanayo dhibbanayaasha iyo baahiyahooda, sida hawlgelinta Guddigii Run-goobista iyo Dibuheshiisiinta ee Koonfur-Afrika, kuwaas oo shaqaynayay muddadii u dhexaysay 1995 ilaa 1998.

Sida uu Teitel qabo, marxaladda ugu dambaysa Caddaladda Kumeelgaarka ahi,waa waajiga uu ku magacaabay xaaladda-sugan(steady-state), amaba 'xaaladda aan isbedbeddelin', taas oo ah marxaladda ay hadda marayso Caddaladda Kumeelgaarka ahi. Waa xaaladda dunida maanta ee ay caalamiyoobeen dhaqanka xuquuqda aadanaha iyo hay'adaha ka shaqeeya labaduba, isla markaasna, ay soo baxayaan dhibaatooyin iyo xasarado hor lihi. Wejigani, waa mid ay isla falgaleen hay'ado iyo heerar kala duwan oo maamul, sida Maxkamado Caalami ah, urur-goboleedyo, ururro bulsho oo rayid ah iyo maamullo deegaanno oo hoose. Caqabadaha cusub ee marxaladdani wajahayso waxa ka mid ah, isu miisaamidda caddaaladda iyo nabadgelyada, iyo sida oo kale la tacaalidda xasaradaha gacankahadalka wata ee jirridaystay, sinaan la'aanta iyo kobcinta dadaallada dibuhabaynta bulshooyinka.

Astaamaha wejiyada cusub ee hannaanka Caddaladda Kumeelgaarka ah waxa ka mid ah, doorka sharciyada amaba adeegsiga qaanuunka, sida in la meelmariyo sharciyo cusub, kuwaas oo sababay dhismaha hay'ado qaanuun oo cusub, oo ay ka mid tahay Maxkamadda Caalimiga ah ee Dembiyada. Astaan kale oo ka mid ah hannaanka Caddaladda Kumeelgaarka ah, ayaa ah aragtida ay qabaan Bar-Tal iyo Bennick, (2004, p. 12), oo ah hannaan dibuhabayneed oo dhab ah. Hannaankani, haddii uu keeno magdhow, iyo ciqaab amaba caddaalad ku salaysan dheellitir xuquuqeed, waxa uu kama dambaysta la imanaya isbeddel iyo dibuhabayn bulsho oo ka timaadda dhinaca hab-fikirka, hadafyada la beegsanaayo, waxyaabaha la aamminsanyahay, dabciga guud, dareenka iyo hab-dhaqanka inta ugu badan ee xubnaha bulshada, ee ku sabsan colaadaha, iyo cilaaqaadka kooxaha kasta.

Astaanta saddexaad ee hannaankani waa kala soocidda labada qaab ee caddaladda ku dhisan ciqaabista iyo tan ku dhisan bogsiinta. Maxkamadihii Nuremberg waxa ay xoogga saareen habka ciqaabista dembiilaha, iyada oo baaxadda dembiyada loo qaybiyay kuwii falalka geystay, ciqaab marintoodana cid keli ahi fulisay. Habka caddaaladeed ee bogsiinta, (waxa ay ku qorantahay qaybta 2aad iyo 3aad ee warbixintan) waxa ka mid ah in dib loo xaqiijiyo qiyam guud oo la wadaago, kaas oo la is la ogolyahay, oo lagu fulinaayo hannaan laba-geesood ah. Walow uu wejiga labaad u badanyahay hannaanka bogsiinta, haddana waxa mar kasta ku jiray qayb ciqaab ah, waana sidii ka dhacday dacwadaha maxkamadihii Rwanda iyo Yugoslavia-dii hore; laakiin labada qaab caddaaladeed ciqaabta iyo bogsiintuba lagama maarmaan ayay u yihiin dhibaatooyinka ka dhex dhaca bulshooyinka qabiiliga ah.

## 2.3. Bulshooyinka qabiili ga ah iyo Caddaladda Kumeelgaarka ah;

Bulshooyinka qabiiliga ahi ma aha kuwo had iyo goor ka kooban hal isir uun; taas beddelkeeda, waxa ay ka kooban yihiin waxyaabo kakan oo isku-dhafan, kuwaas oo ku kala duwan hadba goorta iyo goobta la joogo. Sidaas oo ay tahay, tilmaamaha guud ee ay mujtamaca qabiiliga ahi wadaagaan waxa ka mid ah: dareen ama wacyi xooggan oo is ahaansho iyo iskaashi ku dhisan, kaas oo ka dhexeeya xubnaha qabiilka, qaabdhismeedka maamulka iyo go'aan qaadasho oyin baahsan, oo haddana leh kala sarayn hoggaamineed; isla markaana ku tiirsan xeerarka dhaqanka iyo caadooyinka qabiilka, si loo maareeyo xiriirka bulsho; sarraynta madaxbannaanida iyo dareen adag oo ku wajahan iska caabbinta wixii farogalin debedeed ah; iyo u diyaarsanaanta abaabullada qabiilka, gaar ahaan wakhtiyada xasaradaha iyo colaaduhu jiraan. (Boege et al., 2008).

Bulshooyinka u dhisan qaabka qabiiliga ahi waxa ay ku dhaqanyihiin meelo badan oo dunida ka mid ah, sida Afrika, Aasiya, Bariga Dhexe iyo jasiiradaha ku teedsan badweynta Pacific-ga, inta badanna waxa ay ku garab noolyihiin nidaamyo siyaasadeed, sida dowlado dhexe, kuwo fedaraal ah,boqortooyooyin, iwm. Si kastaba ha ahaatee, waxa xaqiiqo ah in bulshooyinka u dhisan qaabka qabiiliga ahi ku yimaaddeen isbeddello dib u qaabeeyay hannaankooda nololeed, sida nidaamyadii gumaysiga, waddaniyadda, isu furanka dunida amaba carro-edegaynta/caalamiyeynta, dowlad-dhiska casriga ah, dimuqraadiyeynta iyo saamaynta mashaariicda horumarinta. Su'aalaha waaweyn ee had iyo goor soo baxa marka la darsaayo bulshooyinka u dhisan qaabka qabiiliga ah iyo Caddaladda Kumeelgaarka ah waxa ka mid ah, sidaay  qabiilladu gacan uga geystaan ama u yareeyaan xasaradaha yimaadda xilliyada colaadaha.

Qabiilku waxa uu noqon karaa il ay ka soo burqadaan xasillooni-darrada iyo amni xumadu, sababtuna waa iyada oo ay u badantahay in ay qabaa'ilku ku lug yeeshaan loollanada gacankahadalka wata, ee quseeya dhaqaalaha, awood raadinta amaba aargoosiyada qabiilka dhexdiisa ka dhaca amaba qabaalooyinka kale dhex mara. Waxa sida oo kale dhacda, in qabiilku gacankahadal u adeegsado isla dhexdiisa amaba cid bannaanka kaga timid, si uu u ilaaliyo dantiisa amaba saamayntiisa. Intaas waxa dheer, qabiilka in ay duufsadaan, oo taageeradooda kasbadaan hoggaamiyayaal siyaasadeed amaba kooxo hubaysani, iyaka oo tabashooyinka qabiilka uga faa'iidaysanaya danahooda shaqsiga ah.

Geesta kale,waxa dhacda in qabiilku keeno amni iyo xasilooni, iyaka oo waktiyada dhibaatooyinku u fidiya magangelyo u fidiya qabiilkooda amaba qabiillada kale, iyo sida oo kale caawimo amaba dhexdhexaadin khilaaf. Sida oo kale, qabiilku isaga oo saamayntiisa iyo saamaynta kuwa kale ee ay isku xidhan yihiin adeegsanaya, waxa uu ka hor tegi karaa, amaba xallin karaa colaadaha, iyada oo loo marayo jidka wadaxaajoodka iyo doodda. Waxa intaas weheliya, in qabiilku iska caabbiyo ama iska dhiciyo dulmiga iyo xasaradaha gacankahadalka ah ee debedda kaga yimaadda, ee ay ku kacaan cid iyaka ka baxsan, amaba cid qabilka laftiisa ka mid ah, oo halis gelisay madaxbanaanidooda iyo sumcaddooda. (Boege et al., 2008). Sida halkan ba ka muuqata, xogaha qoran ee ku saabsan bulshooyinka qabiiliga ah iyo Caddaladda Kumeelgaarka ahi waxa ay muujinayaan tusaalayaal doorar taban iyo kuwo togan ba leh oo loo maray gacan-ka-hadal.

Dhinaca Soomaaliya, kadib intii dowladdu burburtay 1991, qabaa'ilku waxa ay ku kaceen colaado dhexdooda ah iyo kuwo qabaa'illo kale dhex maray, kuwaas oo ay ka dhasheen xadgudubyo baahsan oo binu-aadantinimada ka dhan ah, iyo dhibaatooyin kale oo daran. Si kastaba ha ahaatee, waxa iyana jirta in qabaa'ilku ay door hormuud ah ka ciyaareen dhalinta hannaankii dibuheshiisiinta iyo dadaalladii nabadaynta oo dhan, sida kii Carta, kii Imbagaati iyo kii Ildooreed ee dhacay sanandihii u dhexeeyay 1999 ilaa 2004, dadaalladaas oo ay ka dhasheen Baarlamaankii iyo Dowladdii Kumeelgaadhka ahayd ee Soomaaliya. Sidaas oo kale, dhinaca Afqaanistaan, qabaa'ilku waxa ay ka qayb qaateen shidista iyo deminta colaadihii kala dambeeyay ee halkaas ka oogmay iyo maamulladii waddankaas ka dhismay; laga soo bilaabo todobaatameeyadii qarnigii tegay. Qabaa'ilku waxa ay si mug leh uga qayb qaateen dadaalladii gudaha ku salaysnaa caddaaladda iyo dibuheshiisiinta, kuwaas oo saldhig ay u ahaayeen shirarkii dhaqan ee jirgas iyo shuras, oo lagu maaraynayay arrimo ay ka mid ahaayeen khilaafaadka dhulka la isku hayay, tabashooyinkii ku saabsanaa xadgudubyadii dagaallada iyo isweydaarsiga maxaabiistii la kala haystay.

## 2.4. Arrimaha muhiimka ah

Caddaladda Kumeelgaarka ahi, waa hannaan ujeeddadiisu tahay in lagu maareeyo raadadka xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha iyo dhibaatooyinka daran ee la gaysto xilliyada colaadaha amaba xukunnada kalitaliska ahi jiraan. Hannaankan dulucdiisu waa waxkaqabashada iyo sixitaanka qaladaadkii hore, kor u qaadista dibuheshiisiinta iyo baanashada nabarrada bulshada soo gaadhay, iyo sida oo kale in la xaqiijiyo la xisaabtanka dambiilayaasha, iyo kahortagga arrimahaas oo kale in ay mustaqbalka soo noqdaan. Hannaankani waxa uu ku qotomaa balanqaad adag oo ku suntan sidii dib loogu soo ururin lahaa, isla markaana loo dhisi lahaa nolosha iyo bulshooyinka dhibaatooyinku kala daadiyeen, iyada oo lagu dul dhisayo hannaan ku dhisan caddaalad, dimuquraadiyad iyo dhawritaanka xuquuqda aadanaha. Iyada oo ujeeddooyinkaas waaweyni ku dhex jiraan meelmarinta hannaankan, haddana fulintiisa waxa ku gedaaman caqabado aan sahlanayn, gaar ahaan marka loo eego ummadaha qaabka qabiiliga ah u dhisan iyo waddamada Afrika ee ay ku wada noolyihiin bulshooyinka kala duwani. Hoos waxa ku qoran qaar ka mid ah arrimo muhiimka oo ay tilmaameen khubarada hannaankan ku xeeldheeri, kuwaas oo ku saabsan hirgelinta Caddaladda Kumeelgaarka ah ee ku salaysan bulshooyinka qabaa'ilka ah.

### *2.4.1. Dareenka u dhexeeya caddaaladda ku dhisan habka ciqaabta iyo tan ku salaysan habka bogsiinta*

Caddaalad marinta ku salaysan habka ciqaabta, iyo ta ku salaysan habka bogsiintu, waa laba hab oo loo maro la tacaalista ama wax ka qabashada caddaalad darrada iyo ku tumashada sharciyada. Hab-caddaaladeedka ciqaabistu waxa uu xoogga saaraa ciqaab marinta dambiilaha iyo dhowrista sharciyada. Hab-caddaaladeedka bogsiintuna, waxa uu xoogga saaraa soo kabista dhaawaca gaadhay dhibbanayaasha iyo dib u soo celinta is-ogolaanshaha bulshada. Iyada oo la eegayo duruufta hadba meesha la joogo, masuuliyiinta qaarkood ayay suurowdaa in ay labada hab midkood doortaan, ama ay labadaba isku dhafaan. Tusaale ahaan, Guddigii Runta iyo Dibuheshiisiinta Koonfur Afrika, waxa ay qaateen habka bogsiinta, iyaka oo cafis u fidiyay dambiilayaashii qirtay gefafkooda, balse waxay dhaleecayn ku mutaysteen in aanay caddaalad ku filan u keenin dhibbanayaashii nidaamkii meesha ka baxay ee midab-takoorka.

Taas lidkeeda, Maxkamadda Caalamiga ah ee Dambiyadii Ruwanda, ayaa qaadatay habka ciqaabta dembiilayaasha, oo la mariyay madaxdii xasuuqa ku kacday, laakiin iyaduna dhaleecayn kamay badbaadin, waxaana lagu eedeeyay in ay ka fogaatay xaqiiqooyinka iyo baahiyaha ka jiray waaqica deegaannada dhibtu ka dhacday. In la helo isu dheellitir ku saabsan adeegsiga labadan hab midka ku habboon hadba xaaladda la maaraynayo, ayaa ah hawl adag oo ay tahay in ay ku sargo'naato xalad kasta iyo marxaladdeeda gaarka ah.

Dhinaca kale, dowladda Ruwanda waxa ay gaarkeeda u hirgelisay hab ku salaysan caddaaladda bogsiinta, kaas oo ay ku lug lahaayeen maxkamado-dhaqameed ku salaysan hannaanka bulshada, oo loo yaqaanno Gacaca. Hannaankaas ujeeddadiisu waxa ay ahayd in la dhiirrigaliyo wadahadal iyo bogsiin dhex marta kuwii xasuuqa ka badbaaday iyo kuwii xasuuqa geystay. Mar kasta, waxa hawl adag ah in la hubiyo isu dheellitirnaanta hababkan kala duwan, kuwaas oo xaal kasta iyo goonnidiisa ku sargo'an, taas oo u baahan in loo dhug yeesho arrimaha siyaasadda, sharciyada, arrimaha bulshada iyo kuwa dhaqanka ee khuseeya xaaladda la maaraynayo.

### *2.4.2. Doorka farsamooyinka dhaqanka iyo caadada*

Marar badan, bulshooyinka Afrika iyo kuwa kale ee hab-nololeedkoodu ku salaysanyahay qabiilka, farsamooyinkooda caddaaladeed waxa qayb ka ah golayaasha duqaytida, cuqaasha, maxkamadaha dhaqanka, culimada diinta, munaasabadaha dhaqan iyo hab-dhaqanno xidid ku leh amaba ku salaysan caadooyinka iyo qiyamka deegannadaas. Si kastaba ha ahaatee, waxa suurowda in ay hababkani leeyihiin dhaliilo iyo meelo aanay awooddoodu gaarin, sida in aanay lahayn sharciyad ay ku salaysan yihiin, in aanay waafaqsanayn halbeegyada xuquuqda aadanaha, in aanay lahayn nidaam islaxisaabtan, ku talagalka baahiyaha kala duwan ee labada jinsi (rag & dumar) iyo in aanay lahayn wax daahfurnaan ah.

Sidaas darteed, khubaradu waxa ay ka doodaan haddiiba ay suuragal tahay iyo qaabka ay ku iman karto in hababkan dhaqan lagu dhex dari karo hannaanka caddaaladda rasmiga ah ee Kumeelgaarka ah. Haddii aan tusaale u soo qaadanno, Guddiga Runta iyo Dibuheshiisiinta Siiralyoon iyo Maxkamadda Gaarka ah ee arrimahan ku shaqada leh, oo masuuliyaddoodu tahay waxkaqabashada xadgudubyadii xuquuqda aadanaha, horumarinta dibuheshiisiinta iyo bogsashada heer bulsho, hubinta meelmarinta islaxisaabtanka dembiyadii dagaalka, iyo fududaynta dibudhiska nidaamka sharciga iyo caddaaladda heer qaran, ayaa kaashaday madax-dhaqameedka heer deegaan iyo kooxaha bulshada rayidka ah, si ay u qabtaan hawlo wacyigelineed oo bulsho iyo in dhegaystaan dacwadaha dembiyadii dhacay.

Dhinaca Yugaandha, dowladdu waxa ay soo jeedisay in xadgudubyadii ay geysteen jabhaddii LRA maarayntooda loo adeegsado nidaamka Mato Oput, oo ah caado loo raaco dibuheshiisiinta; waxaana lagu ladhay isticmaalka sharciyada caadiga ah, magdhowyo la bixiyo, dadaallo nabadayneed, olole dibuheshiisiineed oo ku jihaysan bulshooyinkii dhibtu ka dhex dhacday, laakiin se hannaankaas waxa ka hor yimid dadkii dhibbanayaasha ahaa qaarkood iyo u dhaqdhaqaaqayaashii bulshada, oo dalbaday in mashaakilkooda lagu xalliyo nidaamka garsoorka caadiga ah.

### *2.4.3. Caddaladda Kumeelgaarka ah iyo Haweenka;*

Qodobka dhinaca jinsigu waa mid muhiimaddiisa leh, oo qaabeeya waayo-aragnimada dhibbanayaasha iyo kuwa xadgudubyada ku kaca labadaba. Inta badan, haweenka iyo gabdhaha ayay si xad-dhaaf ah u saameyaan rabshadaha la xiriira colaadahu, sida tacadiyada dhinaca galmada, barakicinta, afduubyada, guurka qasabka ah iwm. Sida oo kale, badiyaa haweenka waa la takooraa, waxaana laga reebaa geeddi-socodka Caddaladda Kumeelgaarka ah. Sidaas darteed, khubaradu waxa ay ku doodaan in la dhaqangeliyo hannaan caddaaladdeed oo la jaanqaadaya Kumeelgaarka ah, kaas oo tirada ama talagalka ku daraya waxyeellada iyo dhibaatooyinka u gaarka ah haweenka, isla markaana tixgelin siinaya kaqaybqaadashada iyo waxkubiirinta haweenka iyo gabdhaha marka loo eego arrimaha ku saabsan dadadaallada nabadaynta.

Tusaale ahaan, waddanka Laybeeriya, Guddiga Xaqiiq-raadinta iyo dibuheshiisiinta waxa ka mid ahaa xubno haween ah oo xaqiijiyay matalaadda iyo kaqaybqaadashada gebi ahaanba hawlaha guddigaas. Dhinaca Keniya, Guddigii Xaqiiq-raadinta, Caddaaladda iyo Dibuheshiisiintu waxa ay soo saareen warbixin gaar ah oo ku saabsan waayo-aragnimada haweenku u leeyiihin xadgudubyada xuquuqda aadanaha xilliyadii kala duwanaa ee ay dhaceen rabshadaha siyaasadda la xiriiraa

# 3. Caddaladda Kumeelgaarka ah iyo Sida loola Akhriyayo Xaaladda Soomaaliya

## 3.1. Taariikhda Rabshadaha Soomaaliya

Muddo tobannaan sano ah, nolosha Soomaalida waxa si joogto ah u halakeeyay, rabshado, colaado iyo ku xadgudubka xuquuqda aadanaha, taas oo ay inta badan ka dhalata loollannada ku saabsan khayraadka dalka oo awelba ahaa mid kooban laga helo dhulka oommanaha ah. Sida ay faafisay Somalia Stability Fund, (2021) taariikhda dambe ee Soomaalida, afar xilli ayaa ku suntan xasilooni darro:

1. Rabshadihii dhacay 1969 ilaa 1991, waa intii Madaxweyne Siyaad Barre xukunka hayay;

2. Xasaradihii dhacay kadib burburkii dowladda ee ka bilaabmay 1991, oo ah xiligii hoggaamiye kooxeedyada;

3. Kadib 2005, oo ay sii ballaaratay saamaynta kooxaha Islaamiyiinta ahi; iyo

4. Cahdigii faragaelinta quwadaha shisheeye, laga soo bilaabo 2007, oo lagu daray hawlgalkii UNITAF (1992-1995), faragelintii ciidamada Itoobiya (2006-2008), iyo hawlgalka haatan socda ee Midowga Afrika (AMISOM).

Afarta xilli ee kor ku sheeggan, dhamamantood waxa ay ku tilmaannaayeen rabshado gacankahadal wata iyo tacadiyo xaddhaaf ah oo ka dhan ah xuquuqda aadanaha, mar kasta na dembiilayaasha iyo dhibanayaashu waa ka la geddisnaayeen xilliyadii ka la duwanaa. Warbixin ay Hay'adda Human Rights Watch (2021) faafisay ayaa sheegtay tacadiyo nidaamsan oo ka dhan ah sharciga caalamiga ah ee aadminimadu in ay gobolka ka dhaceen, falalka qaarkood na waxayba gaadheen heer dambiyo dagaal. Tusaale ahaan, kooxda hubaysan ee al-Shabaab, waxa ay fulisay weerarro aan loo miidaan deyin iyo kuwo qorshaysan labadaba, waxaana lagu tuhunsanyahay in ay caruur yaryar u qaataan ciidan ahaan.

Sid aoo kale, dhibaatooyin khasaare badani ka dasho oo rayidka soo gaara iyo barakacba waxa abuura dagaalada beelaha ka dhex dhaca, ciidamada ammaanka dhexdooda oo gacankahadal ka dhex qarxo, taas oo ay barbar socoto howlgallada militari ee ka dhanka ah al-Shabaab, oo ay mararka qaarkood si wada jir ah u fuliyaan dowladda Soomaaliya, AMISOM iyo ciidamo kale oo ajnebi ah. Xoogaga shisheeye ayaa isugu jira kuwo Maraykan iyo kuwa Qaramada Midoobay, iyaka oo wakhtiyada qaarkood taageeraayay hoggaamiye kooxeedyadii deegaamada ka jiray. Dagaaladaas oo ilaa hadda sii socda waxa ka dhashay dhimasho, barakac iyo burbur hantiyeed oo baahsan. Mushkiladahaas is barkan, iyo halisaha muuqda ee is bedelka cimilada iyo saamaynteeda dhaqale, waxa ay Khasab ka dhigayaan in hannaanka Caddaaladda Kumeelgaarka ahi uu mudnaanta siiyo dadka iyo deegaanka labadaba. Xog faahfaahsan oo ku saabsan tacadiyadaas iyo dembiyada la galay waxa la ga heli karaa illo ka la duwan, oo ay ka mid yihiin Muhammed, (2018), Pentikäinen & Hill, (2021), Somalia Stability Fund, (2021).

## 3.2. Dhaqanka Soomaalida iyo Xallinta Khilaafaadka

Bulshada Soomaaliyeed waxa ay xallinta khilaafyada u adeegsan jireen habab dhaqanka iyo shareecada islaamka ka soo jeeda. Hababkaasi waxa ay ku salaysnaayeen mabaadiida wadaxaajoodka, dibuheshiisiinta iyo caddaaladda, waxaanay ahaayeen kuwo wax-ku-ool u ah xallinta ismaandhaafyada iyo dhawrista nabad ku wada noolaanshaha bulshada. Abdile (2012), waxa uu sharaxaad ka bixiyay sida ay odayaasha beeluhu u adeegsadaan farsamooyinka kuwaas ah, si ay khilaafyada jira u dhexdhexaadiyaan, amaba u fuliyaan heshiisyada la gaadho, taas oo ku qotonta qiyam iyo caadooyin ay dhinacyadu wadaagaan oo la ga soo dhiraandhiriyay dhinaca diinta iyo dhaqanka.

Sharciyadda iyo awoodda odayaasha beeshu waxa ay ku xirantahay sida ay dhinacyada is haya u gu qanciyaan in ay aqbalaan go'aamada soo baxa ee ka yimaadda xeer-dhaqameedka iyo culimada diinta, labadaas oo loo aqoonsanyahay xaqsoor iyo cadli. Labada hab  ee lagu xaliyo khilaafaadka soo jireenka ahi waa adeegsiga Xeer-dhaqameedka iyo Culimada diinta oo loo noqdo. Ka hore, oo ah xeer-dhaqameedka, waxa uu ku dhisanyahay abtirsiimo qabiil, caadooyin, qiyam ku salaysan dhaqanka iyo shareecada Islaamka.

Xeerku waxa uu hagaa amaba jaangooyaa sida qof kasta ay tahay in uu u dhaqmo bulshada dhexdeeda, waxaanu keenaa hab lagu xalliyo khilaafaadka, iyada oo taas na loo maraayo odayaal qaata doorka dhexdhexaadiyaasha iyo xeerbeegtida labadaba.

Geesta kale, culimadu waa gole ay ku mideysanyihiin dadka aqoonta diineed leh, oo sida odayaasha oo kale, soo farageliya colaadaha, isla markaana bixiya tilmaamo ku saleysan mabaadii'da dhinaca diinta. Xeerarka dhaqan iyo culimada diintu ba waa kuwo aad loo ixtiraamo, oo ay Soomaali badani ka door bidaan nidaamka garsoorka ee rasmiga ah, kaas oo loo arko mid waxtar aan lahayn, musuq ah ama eex ku salaysan. Xeerku waxa uu ka dhiganyahay hab kale oo khilaafaadka lagu xaliyo, oo ay adeegsadaan odayaasha qabiilku, waxaana si ahaan u gu dhex jira qaab cadaaladeedka bogsiinta ku salaysan. In kasta oo xeerku dabci ahaan aanu diin ku salaysnayn, hadana waxa qayb ka ah caadooyinka iyo mabaadii'da shareecada waxyaabo la ga soo dhiraandhirriyay.

Asal ahaan, Xeerku waxa uu xallinta khilaafaadka u adeegsadaa istraatiijiyad ku salaysan gorgortan, dhexdhexaadin iyo gar-qaadis. Hawlahaas oo dhan waxa lagu fuliyaa hab is xilqaan iyo iskaa wax-u-qabso ku salaysan, oo ku shaqeeya heshiiska iyo is la ogolaanshaha qabiilka dhexdiisa. Haddii ay timaado xaalad xeerku shaqayn waayo, waxa arrinta loo gudbiyaa culimo diineed, waxaanay ku shaqeeyaan hannaanka sulxiga, oo ah nooc ka mid ah heshiisiinta shareecada ku salaysan. Haddii xaalku jiq noqdo oo la is mari waayo, xaajada waxa loo gudbiyaa culimo kale oo kuwa hore ka aqoon iyo khibrad badan, waxaanay toos u la fal galaan dhinacyada is haya si ay xal u dhaliyaan.

Marka la eego doodda Özerdem et al. (2021, p. 424), geedi-socodyada nabadeed ee Qaramada Midoobay ay hoggaaminayso, si guud ahaaneed, Soomaaliya gudaheeda dadku waxa ay u arkaan nidaam ay dabada ka riixayso dano ajnebi iyo faragelin shisheeye; Sidaas darted, hababka dhaqan ka ee dadku ogolyahay waxa ay keenaan xal badiil ah oo loo noqdo si loo xalliyo khilaafaadka. Sharciyadda taas ah ee hab-dhaqameedku haysto, waxa ay dhiirrisaa dhinacyada is haya in ay ka qayb qaataan hannaanka maaraynta khilaafka. Nidaamyada caddaaladda ee ku salaysan hab dhaqanka ayaa si weyn u saameeya geeddi socodka nabadda ee Soomaaliya. Pentikäinen and Hill (2021) waxa ay qiimayn ku sameeyeen doorka uu hoggaamiyaha adeegaha bulsho ku tilmaamani ka qaadan karo fududaynta hababka dibuheshiisiinta ee Soomaaliya.

Waxa ay labadaas khabiir ku doodeen, in hoggaaminta adeegaha bulsho, oo ku dhisan mabaadii'da waaweyn, ee ay ka mid yihiin isdhuldhigga, isudhimrinta, islatacaadufka, is ka war qabka iyo bulsho dhisiddu ay la jaanqaadi karto qiyamka iyo hab-dhaqanka Soomaalida ee dibuheshiisiinta, sida wadaxaajoodka, iscafinta, isbogsiinta iyo iskaalmaynta qabiilka. Waxa ay khubaradu muujinayaan tusaalayaal ku saabsan sida hoggaamiyayaasha ku tilmaaman adeegayaal bulsho ay u gu guulaysteen in ay dhexdhexaadiyaan dinacyo is haya, ay u kobciyeen kalsoonida iyo is kaashiga, horumarinta bogsiinta bulshada iyo xoojinta dadaallada nabad-dhisidda ah ee Soomaaliya.

Gundhigga dooddooda waxa ay ka dhigeen, in doorka hoggaamiye bulsho uu yahay hab muhiimad sare leh oo loo waajihi karo maaraynta dhibaatooyinka daran ee wejiyada badan leh ee dibuheshiisiinta bulshooyinka jooga marxaladda colaadaha ka dambaysa. Labada khabiir ee Pentikäinen iyo Hill (2021) buugooda falcelinta khilaafadka iyo hogaaminta , waxa ay ku dareen hal cutub oo ay ka ga hadleen waxa uu yahay hoggaamiye ah adeege bulsho. Hoggaaminta adeegaha bulsho, waa qaab lagu horumariyo hoggaaminta, taas oo xoogga saarta u adeegidda baahiyaha iyo danaha dadka kale ee bulshada ka mid ah, taas oo ah caksiga hoggaaminta ku dhisan xoogga iyo adeegsiga awood dadka ka saraysa.

Pentikäinen iyo Hill (2021) waxa ay ku doodayaan in doorka odayaasha qabaa'ilka iyo hababka dibuheshiisiinta dhaqameed ee Soomaaliya ay tusaale u yihiin xaqiiqada waxa ay u gu yeedheen hoggaaminta adeegayaasha bulsho. Waxa ay ka shaqaynayaan, ayay labada khabiir ee Pentikäinen iyo Hill leeyihiin, in ay odayaasha beelaha hoggaamiyaa dib u kiciyaan qaab-dhismeed dawladeed oo sharci ah iyo adkaynta wadajirka bulshada, iyada oo ay jirto colaad iyo xasillooni-darro daba-dheeraatay. Waxa kale oo ay qaban, in hoggaamiyayaasha noocaas ahi ay tusaale iyo duruus qiimo badan u noqon karaan kuwa meelaha kale ee Afrika ka wada dadaallada Colaad deminta iyo nabad dhiska ah. Wax dheeraad ah cidda rabta in ay ka ogaato labadan khabiir doodahooda iyo cadaymahooda, cutubka ay amuurtaas ka qoreen waxa la ga akhriyi karaa - Pentikäinen, A., & Hill, O. T. (2021). Labadoodu waxa ay 2021kii qoreen buugga Servant Leadership: A Guide for Aspiring Leaders", halkaas oo ay ku falanqeeyeen mawduuca hoggaamiyaha bulsho ee ay ka hadlayaan.

Hoggaaminta noocaas ah, qabkeeda hoggaamineed waxa ay labadan khabiir ku qeexeen, mid hoggaanka ku sifoobay uu u taaganyahay daboolista baahiyaha dadka kale, oo aan tiisa ku foognayn. Iyaka oo sii wada, khubaradu waxa ay ku doodeen in hoggaaminta noocaas ah ee adeegaha bulsho aanay ahayn oo keliya mid ku tilmaaman wax-ku-oolnimo iyo anshax sareeya, bal se waa mid faa'iido u leh kobaca shakhsi ahaaneed iyo wanaagga hoggaamiyaha laftiisa Waxa ay tusaale ahaan u soo ban-dhigeen hoggaamiyeyaasha adeegayaasha bulsho ah ee guulo ka soo hooyay qaybaha ka la duwan ee nolosha, waxayna soo jeediyeen talooyin iyo farsamooyin wax ku ool ah oo wax ka taraaya horumarinta xirfadaha hoggaaminta adeegaha bulsho.

Labadan khabiir, iyaka oo ka hadlaaya doorka hoggaamineed ee adeegyada bulsho iyo duruufta guud ee dibuheshiisiinta Soomaaliya, waxa ay ku sheegeen cutubka cinwaankiisu yahay – oday-dhaqameedka iyo caadooyinka dibuheshiisinta Soomaaliya: Taabbogalinta Shaqada Hoggaaminta,  Iyada oo Dib loo dhisayo Qaabdhismeedka Haykalka Maamulka Sharciga ah " taas oo ku xusan buuggooda "Routledge Handbook of Conflict Response and Leadership in Africa", sida ay odayaasha qabaa'ilka, oo adeegsanaaya hab isku dhaf ah, oo kulminaaya dhaqanka iyo diinta, oo loo raacay xallinta colaadaha, ay ugu suurowday in ay Soomaaliya dib u gu dhisaan hay'ado dawladeed oo leh sharciyad siyaasadeed, iyaka oo helaaya taageero amaba kaalmo hay'ado debadeed.

Labada khabiir ee Pentikäinen iyo Hill (2021) waxa ay tilmaameen saddex sababood oo muujinaaya in hoggaan-dhaqameedka, qaab-dhismeedka bulsho iyo hababka xassarad maaraynta ee dhaqanka oo la isku daray ay muhiim u yihiin geeddi-socodka nabadda ee wadamada nugul: (1), arimahaas la soo sheegay oo leh sharciyad asal ah; (2), iyada oo ay yartahay suurtagalnimada ay samayn u gu yeeshaan farogelin shisheeye amaba mid hoggaamiyayaal siyaasadeed; iyo (3), iyo awoodda ay u leeyihiin in ay demiyaan rabshadaha salka ku haya diinta amaba fikradaha gurracan ee dhaqanka ku sal leh. Sidoo kale, Özerdem et al. (2021, p. 409) waxa ay ku dheeradeen in hababka maxaliga ah ee xallinta khilaafaadka, ee ay bilaabeen, is la markaana ay hoggaaminayeen odayaasha qabiillada, oo kaashanaayay hay'adda Finn Church Aid, ay keeneen natiijooyin waaray oo ka wanaagsan kuwii Qaramada Midoobay ee ku dhisnaa xaalka kor la ga keeno ee hoos loo soo dhaadhiciyo, kuwaas oo badiyaa burburay wax yar uun ka dib markii la bilaabay hirgelintooda.

Sidaas oo ay tahay, hadana dadaaladii nabadda ee Soomaaliya had iyo goor ma ahayn kuwo hababka dhaqanka ku salaysan door-bida. Colaadihii sokeeye iyo dadaaladii nabad raadinta ahaa ee ka dambeeyay, kuwaas oo dhamaantood ku salaysnaa habka ku dhisan xaalka oo kor la ga keeno, hoos na loo soo dhaadhiciyo, inta badan waxa ay sababeen hindisayaal guuldarraystay. Sababta ay dadadaalladaasi u guulaysan waayeen waa hababka xaalka loo maray oo dadka u la muuqday in aanay lahayn wax sharciyad ah, iyo dadaalladaas oo ka gaabiyay in ay si micno leh odayasha beelaha uga qayb geliyaan hannaanka xal raadiska ah. (Njoku, 2013; Özerdem et al., 2021) . Sidaas darted, in kasta oo natiijada Shirkii 2004kii ka dhalatay oo ahayd Dawladdii Fadaraalka ee ku meel gaadhka ahayd (TFG), oo ay taageersanaayeen Maraykanka, Qaramada Midoobay iyo Midowga Afrika intuba, hadana waxa ay awoodi weyday in ay maamulkii dawladda ee dhexe fidiso, iyo in ay xakamayso awooddii beelaha. (Menkhaus, 2014).

Odayaasha, haweenka iyo dhalinyarta beeluhu, iyaka oo dhab u fahamsan muhiimadda ay leedahay dadaallada dibuheshiisiineed ee ay bulshadu hormuudka ka tahay, waxa ay bilaabeen wadatashiyo colaadda lagu qaboojinaayo, iyada oo aanay madaxda sare wax lug ah ku lahayn. Dadaallada nabad-raadinta ah ee Guulaysta ee maxaliga ah, ayaa ah kuwo lagu tabcay iyada oo la raacaayo hababka dhaqan ee bulshada Soomaaliyeed, badiyaa na colaadaha xallintooda jidkaas loo raacaa ma soo noqdaan. (Pentikäinen & Hill, 2021).

Walow ay guulaha kuwaas ahi jiraan, hadana hababka cadaaladeed ee dhaqanka ku salaysani ma aha kuwo caqabado ka maran. Arimaha ku saabsan ahaanshaha iyo sharciyadda hababkaas ayaa ah kuwo weli taagan; iyada oo Cabdile (2012) uu ogaaday in ay aad u yaryihiin hoggaamiyayaasha dhaqan ee awood u leh in ay go'aamiyaan wadahadal nabadeed, badankoodu na ay beelahooda ka haystaan uun aqonsi ka la dhantaalan.

Madax dhaqameedka qaarkood, waa kuwo iskood isu magacaabay, ma na laha wax sharciyad ah, kuwo kale na, kor ayaa la ga keenay, si hannaanka nabadda loo gu afduubo. Intaas waxa dheer, iyada oo khubaradu ay odayaasha dhaqanka ku dhaleeceeyeen in ay si bareer ah u hor taganyihiin in la hirgeliyo nidaam doorasho ka wanaagsan midka hadda jira, ee ku salaysan qaab beeleed duugoobay, oo aan la jaan qaadayn is bedelka siyasadeed iyo ka tirada dadweynaha toona.

Waxa intaas dheer, iyada oo hoggaan-dhaqameedyadu aanay lahayn wax waayaragnimo ah oo ku saabsan dadalaada caalamiga ah ee nabad-dhiska wixii casharro ah ee la ga bartay, taas oo lagamamaarmaan ka dhigta taageero loo ga baahdo daneeyayaal debadeed. Geesta kale, ururada bulshada rayidka ah, gaar ahaan kuwa u dooda xuquuqda dadka la ga tiro badanyahay, ayaa mar walba ka gaws-qabsada in odayaasha beeluhu ay ka qayb qaataan hannaanka dibuheshiisiinta. Sidoo kale, dhexdhexaadiyeyaasha caalamiga ah iyo daneeyayaasha maxalliga ah ee nidaam-fikirka dawladeed ee Reer-galbeed ku shaqeeya, ayaa dhib weyni ka haysataa sidii ay odayasha dhaqanka u la macaamili lahaayeen, sababtoo ah waxa haysta faham darro ku saabsan xeerarka dhaqan iyo habraacyada jira oo aanay la haysan.

Intaas waxa weheliya, iyada oo siyaasiyiintu ay odayaasha dhaqanka ku lug lahaanshahooda hannaanka dibuheshiisiineed u arki karaan in ay sharciyaddooda wax u dhimayso, Sidaas darted na ay ku dadaalaan sidii odayaasha Meesha loo ga riixi lahaa. (Lepisto, 2015). Ugu dambayn, Roberts (2020) waxa uu ka digay in hannaanka Caddaladda Kumeelgaarka ah ay afduubaan daraf saddexaad oo iyaku danno gaar ah leh. Roberts isaga oo daliishanaaya waayihii Guddigii Koonfur Afrika ee Runta iyo Dibuheshiisiinta, waxa uu ku dooday in badiyaa hababkani ay ku guuldaraystaan ka gungaaridda xididka hoose ee xassaradaha sababay. Sidaas darted, haddii la doonaayo in miro wanaagsani ka soo baxaan hannaanka Caddaladda Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya, waa in ciladaha kuwaas ah ee la tilmaamay fiiro loo yeesho, la waajaho oo wax na la ga qabto.

# 4. Gunaanadka

Aragtida Kakanaanta oo ah mid saameyn weyn ku leh culuumta siyaasadda iyo guud ahaanba siyaasadda maamulka dadweynaha, waxa ay xoogga saartaa fahamka nidaamyada bulshooyinka, oo ah mid isku murugsan oo haddana kobcaaya, gaar ahaan siyaasadda la qaato wakhtiyada adag. Haddaba, marka la falanqaynaayo qaabdhismeedka Soomaalida ee soo jireenka ah, aragtidani waxa ay soo jeedinaysaa in isbeddel lagu sameeyo sida loo eegaayo; halkii dabciga bulshada Soomaaliyeed loo arki lahaa mid is ka taagan oo aan isbeddel lahayn, waxaanay qabtaa in hababka iyo hay'adaha dhaqan ee jira lagu eego aragtida guud ee tilmaamaysa koritaanka dabiiciga ah ee ku saabsan is dhexgalka iyo koboca dhaqanka bulsho.

Aragtidaasi waxa ay jidka u xaaraysaa helitaanka hab caddaaladeed oo garowsan duruufta khaaska ah ee Soomaaliya. Habka Caddaladda Kumeelgaarka ahi waxa ay qabtaa in filashada daneeyayaasha la maareeyo. Caqabaddu, sida uu iftiimiyay A. Dersso (2017), waxa ay tahay "Goldaloolooyinka hirgelinta", kuwaas oo badiyaa lagu arko hababka farsamo ee hirgelinta Caddaladda Kumeelgaarka ah, iyada oo ceebo badani ka soo baxaan marka hal qaab oo keliya loo adeegsado xalad kasta. Tusaale waxa ahayd saamayntii aadka u xaddidnayd ee ay yeelatay maxkamadayntii dembiyada Itoobiya.

## 5.1. Cayimaadda Baahida loo Qabo Caddaladda Kumeelgaarka ah

Natiijo muhiim ah oo la ga gaadhay doodaha haatan jira ee mawduucan ku saabsan, ayaa ah dadaal kasta oo lagu hirgelinaayo Caddaladda Kumeelgaarka ah, ay tahay in u gu horaynba la ga bilaabo dhinacyada ay khusaysaa in ay is la qiraan in cadaalad darro dhacday, is la markaana, la xadido baaxadda cadaalad darrooyinka la doonaayo in wax la ga qabto. Soomaaliya, baahida loo qabo hirgelinta Caddaladda Kumeelgaarka ah, waxa la ga dheehan karaa ku qanacsanaan la'aanta qaab dhismeedka bulsho iyo kan siyaasadeed ee haatan jira, oo ay ka mid yihiin hannaanka doorashooyinka iyo matalaadda ay helaan kooxaha ka la geddisan, ee khuseeya arimaha dhaqaalaha iyo bulshada ee ka la duwan.

Sida oo kale, amni darrada ka dhalata dhibaatooyin hore oo aan la xalinin, oo ka dhex aloosan kooxaha kala duwan, ayaa abuura tabashooyin iyo kacdoono ka imaanaya qeybaha ka la duwan ee bulshada. Dhinac kale oo muhiimad in la siiyo ay tahay, oo warbixinta hay'adda Somali Stability Fund (2021) ay muujisay waxa ka mid ah, xadgudubyada dhinaca galmada iyo guud ahaan jinsiga ku saabsan, iyo khasaaraha hantiyeed ee ka dhashay xasaradaha oogan.

## 5.2. – Ku Luglahaanshaha Daneeyayaasha

Qayb muhiim ah, oo ka mid ah dadaalka loo gu jiro hirgelinta Caddaladda Kumeelgaarka ah, ku na dhacda qaab loo dhanyahay oo ku salaysan hab-dhaqameed qabiil, waa in la hubiyo ka qayb galka dadka daneeyayaasha ah ee ay khusayso oo dhan. dhinaca Soomaaliya, waa lama huraan in la cayimo ama la isla garto, daneeyayaasha muhiimka ah ee nidaamka caddaaladda ka qayb qaadanaya kuwa ay yihiin, taas oo barbilow u noqonaysa horumarinta hannaanka qaybgal bulsho. Sida özerdem et al. (2021, p. 414) uu tilmaamaayo, "Qaramada Midoobay waa in ay bilowdo wadatashiyo hoose oo ay la yeelanayso hoggaamiye-dhaqameedyada beelaha, oo ay ka dhegaysato, oo ay ka dalbato in ay keenaan qorshihii colaadaha lagu soo afjari lahaa."

Marka la eego xaaladda haatan taagan, daneeyayaasha la xusi karo waxa ka mid ah - shakhsiyaadka dhibanayaasha ah iyo qoysaskooda, bulshooyinka dadka lagu tacadiyay ka mid yihiin ee dhibaatadu saamaysay, kuwa dembiyada galay, kuwa iska daacadda ah ee loo adeegsaday hurinta colaadda, ururrada bulshada, hay'adaha dowladda iyo kuwa dibadda iwm.

## 5.3. Dulmanayaasha

Sida ay qabaan McEvoy iyo Mcconnachie, (2013), dhibanayaasha iyo qoysaskooda, qaraabadooda dhow, iyo xubnaha guud ee bulshada dhibtu ka dhex dhacday, ayaa ah had iyo goor kuwa u horreeya ee ka faa'iidaysta meelmarinta hannaanka Caddaladda Kumeelgaarka ah. Dulmanayasha/dhibanayaasha caddaalad darradu ku dhacday waxa ay isugu jiraan kuwo ay xasaraduhu si toos ah u saameeyeen, waxaana ka mid ah haweenka, carruurta iyo dadka hantidooda la burburiyay. Sidoo kale, waxa faa'iidadaasi gaadhaa ehelka iyo asxaabta kuwa ay colaaduhu saameeyeen, ee dadkooda ay jeclaayeen la laayay, amaba la tacaalaaya daryeelka muddada dheer ee ehelkooda xasaradaha ku naafobay, iyo kuwa guryahooda colaadaha lagu dumiyay, ee taasi ay samayn ku yeelatay fayoobidooda jidh ahaaneed amaba maskax ahaaneed.

Marka ay Sidaas tahay, tabta u gu wacan ee loo la falgalo dulmanayaasha iyo eheladoodu waa in loo mariyo sheekooyinka togan ee waxtarka soo kabashada iyo is cafintu ku jirto leh. (McEvoy and McConnachie, 2013). Badiyaa, bulshooyinka mabaadii'da dhaqankoodu ku qotonto mabaadii'da ku salaysan dhaqan Afrikaanka iyo diinta Islaamku waxay doorbidaan xal ku yimaadda dhexdhexadin iyo heshiisiin, halkii ay ka aarsan lahaayeen cidda dhibta u geysatay, waxaana heshiiska ka mid ah tusaale ahaan, in dib loo dhiso guri la dumiyay, amaba la bixiyo kharashka caafimaad ee ku baxa daryeelka ilmo xubin jidhkiisa ah la ga gooyay. Marka hawshan lagu jiro, muhim waxa ah in la dhegaysto codadkaas oo saldhig u ah abuurista qaab midnimo bulsho.

### *5.3.1. Kuwa dulmiga geystay*

Isku dayadii hore ee meelmarinta Caddaladda Kumeelgaarka ahi waxa ay xoogga saareen ciqaabista kuwa dulmiga geystay, iyo in ay magdhow bixiyaan. Walow dawladaha iyo bulshada caalamku ba ay doorbidaan in ay sida u gu adag u ciqaabaan kuwa dadka aan waxba galabsan ku la kaca dembiyada foosha xun, hadana waxa suurow ah in sidaasi ay xaalka u ga sii darto uun, halkii nabadgelyo la ga doonaayay na ay xasarado kale uuni ka sii dhashaan. Dembiilayaal badan, oo ay ka mid yihiin kuwa ku hawlan argagixisanimada, ayaa u badan dad is ka daacad ah, laakiin se maankooda la ga buuxiyay nacayb iyo rabitaan xasaradeed.

Sida Dersso (2017) uu qoray, "Caddaladda Kumeelgaarka ah waa in loo qaabeeyaa, loo na hirgeliyaa si dhibanayaasha iyo dembiilayaasha labadaba aakhirka ka dhigaysa muwaadiniin fiican." Dadaalka qaabkaas ahi waxa uu u baahanyahay in caddaaladda Kumeelgaarka ah la dhex geliyo siyaasada, nidaamka dhaqan-dhaqaale, iyo shaqooyinka hay'adaha qaran ee darsaaya sida marka hore ba ay xasaraduhu ku yimaadeen.

### 5.3.2. Ururrada Bulshada Rayidka ah

Shaqada ururada loo yaqan bulshada rayidka ah, ayaa ilaa hadda lama huraan u ah doodaha ku saabsan siyaasadda khusaysa Caddaladda Kumeelgaarka ah ee heer qaran. Ururada matala Bulshada Rayidka ahi waxa ay door weyn ka ciyaareen diyaarinta iyo qaabaynta Guddigii Runta iyo Dibuheshiisiinta ee Koonfur Afrika, iyaka oo ka qayb qaatay dooddo iyo shirar heer siyaasadeed ah oo daaha gadaashiisa ka dhacay. Kiisaska la qaaday intooda badan, guddiyada hawsha u xil saarani waxa ay ku tiirsanaaayeen taageerada bulshada rayidka ah, oo iyagu fududeeyay sidii loo gaari lahaa dhibanayaasha guud ahaan iyo bulshada intooda la takooro. (Brancovic iyo Merwe [eds], 2018). Marka la eego dhinaca Soomaaliya, Doorka tiirdhexaadka ah ee ururada bulshada rayidka ahi ay hawshan oo kale ka ciyaari karaan, oo lagu kabay saamaynta dawladda ee is ka xaddidan, waxa suuroobi karta in hab-dhaqameedka cadalaadda lagu kordhiyo waxyaabo cusub oo horumar leh, sida matalaadda haweenka iyo dadka la ga tiro badanyahay oo kale.

### 5.3.3. Hay'adaha Dowladda iyo Daneeyayaasha kale ee Debedda

Hay'adaha dawladeed, madaxda siyasadeed, iyo xoogaga caalamiga ah, sida Qaramada Midoobay iyo Midowga Afrika ayaa doorkoodu si adag muhiim u gu yahay Kumeelgaarka ah. Fashilka dadaaladii hore, ee ku salaysnaa qaabka dulkakeenka ah, ee xaalka caddaaladda kumeelgaarka ah bulshooyinka kor lagaga keeno, waa in uu cashar u noqdo bulshada caalamka. Doorka keliya ee ay qaadan karaan matalayasha bulshada caalamku waa in uu ahaado bixinta taageero dhaqaale iyo mid farsamo, intaas ka dib na, ay xaqiijiyaan meelmarinta heshiisyadii la gaaray.

Marka la eego doodda Somalia Stability Fund (2021), wakhtiyada ay jiraan dhibaatooyin joogto ah, maamulku na uu yahay mid daciif ah, kaas oo loolan joogto ah ku la jira xoogag kale oo aan dawladda ka mid ahayn, suurtagal ma aha in qab-dhismeedka dawladeed uu keligii xaqiijiyo hadafyada la ga leeyahay meelmarinta Caddaladda Kumeelgaarka ah. Marka ay Sidaas oo kale tahay, xaaladda waxa ku hahboon nidaamyada siyaasadeed ee isku-dhafan, sida gole guud oo ay ku kulmaan khubarada gudaha iyo kuwo dibadeed, hoggan-dhaqameedka iyo culimada diinta, aqoonyahannada maxalliga ah, aqoonyahanka caalamiga ah, matalayaasha beelaha la ga tirada badanyahay, haweenka iyo kooxaha kale ee la takooro intaba.

## 5.4. Caqabadaha iyo Fursadaha

### *5.4.1. Ogsoonaanta Saamayntii Isticmaarku ku yeeshay Caddaladda Kumeelgaarka ah*

Caqabadaha hor taagan meelmarinta caddaaladda kumeelgaarka ah ee Afrika midkood ayaa ah hanaan-cadaaladeedka rasmiga ah, kaas oo ku fashilmay in uu wax tixgelin ah siiyo xaqiiqooyinka ay ka mid yihiin saamaynta cadaadisyadii taariikhdii dheerayd ee gumaystayasha iyo gumaysiga ka dib, xasilooni darro siyaasadeed iyo saboolnimada dhaqaale ee qaaradda. Faham loo yeesho soo-yaalkii isticmarku waa mid muhiimadeeda leh, maxa yeelay waxa ay ka tageen dhaxal qayb ka noqday qaab-dhismeedka nidaamyada siyaasiga ah ee bulshooyinkii ay dusha ka haysteen.

Nidaamkii dawladeed ee gumaystayaashu wax ku maamulaayeen marka baaritaan lagu samaynaayo, waa in lagu xukumo siyasadahoodii dhaqaale ee kharaad-boobka ku salaysnaa, gaabisnimadoodii dhinaca hubinta waxyaabaha dhacaayay iyo isu dheeli tir la'aanta danaha, iyo sinaan la'aanta dhinaca awoodda siyaasadeed ee maroorsiga ku dhisnayd. (Dersso, 2017). Sidaas darted, Soomaaliya waa in ay is ka saxdo sharciyad darada ku jirta qaab-dhismeedka dawladeed ee gumaystihii la ga dhaxlay ee astaamaheedu ka muuqdaan. Taasi waxa ay ku xidhnaan doontaa sida loo meel mariyo hannan si dhab ah u ogolaanaaya ka qayb-qaadashada siyaasadda loo dhanyahay, iyo cadaallad u qaybsiga khayraadka waddanka ee bulshada dhexdeeda.

### *5.4.2 Awoodda Aragtiyaha*

Qaababka dhaqan ee jiraa waxa ay door aad muhiim u ah ka ciyaaraan fahamka waaya aragnimada wadareed ee bulshooyinka ka la geddisan. (Kane, 2000, p. 312). Si kastaba ha ahaatee, isku darka tasarufkii isticmaarka iyo dagaalladii sokeeye ee Soomaaliya waxa ay ka qayb qaateen nabaadguur ku dhacay hab-dhaqankii iyo waxyaabihii dadku aamminsanaa ee caadooyinka u badnaa. Nasiibdarro, xaqiiqadaasi waxa ay horseedday in la waayo waxyaabo qiimo badan lahaa oo ka mid ahaa dhaxal-wadareedka Soomaaliyeed. Xaaladda caynkaas ah, waxa caqabad adag noqotay in la is la cayimo ama la is la garto odayaal-dhaqameedka dhabta ah ee dadka matala. sida ay qireen khubaradii aan hore u soo aragnay. Iyadoo la eegayo duruufaha kuwaas ah, marka la dhaqan-gelinaayo cadaaladdda kumeelgaarka ah, lama huraan waxa ah in muhiimad weyn la siiyo kobcinta hababka dhaqanku saamaynta ay leeyihiin.

Helitaanka adeegga caddaaladdu waa in ay noqoto xaqiiqo beelaha deegannada ka dhaadhacda, si loo xaqiijiyo waxtarkeeda. Tusaale la taaban karo waxa tan u ah, hindisayaasha ay samaysay hay'adda Finn Church Aid, oo la timid hab dhiirigelin leh oo dadka Soomaaliyeed, oo ay ku jiraan qurbajoogu, awood u siinaaya in ay mas'uul ka noqdaan dejinta barnaamijyo nabadeed oo ku habboon xaaladdooda gaarka ah. Intaas waxaa dheer, iyada oo hay'adani fududaysay dadaallo cilmi-baaris ah oo ay hoggaaminaayeen shakhsiyaad bulshada lafteeda ka mid ah, sida uu faahfaahiyay Lepisto, (2013). Habka kaasi ma aha uun mid hoosta ka xariiqaya muhiimada weyn ee ay leeyihiin fikradaha iyo aragtiyaha maxaliga ahi, laakiin sidoo kale waxa uu habkani aqoonsanyahay faa'iidada weyn ee ku jirta in bulshooyinka dhibtu samaysay laftooda la ga qayb geliyo dadaallada ay ku qaabaynayaan hannaankooda ay ku gaarayaan caddaalad bogsiin ah.

### *5.4.3 Qeexidda Mabaadiida Dib-u- heshiisiinta Dhaqanka*

Fikradda Caddaladda Kumeelgaarka ah ee bulshooyinka qabiiliga ahi, waa mid ka gudubsan xayndaabka hababka sharci ee rasmiga ah. Sida hore ba loo sheegay, ka qayb qaadashada daneeyayaasha geeddisocodka Caddaladda Kumeelgaarka ahi; waa in ay mudnaanta siiyaan waayo-aragnimada iyo baahiyaha dhibbanayaasha, iyada oo lagu taaganyahay mabaadii'da dibuheshiisiinta. Si loo xaqiijiyo nabad waarta, waxa muhiim ah in la iskaga tago hababka ku dhisan xanuunjinta iyo ciqaabidda oo keliya, xooggana la saaro fahamka iyo wax ka qabashada sababaha asaasiga u ah colaadda. Xaaladdan oo kale, ku dhaqanka mabda'a ka duulaya 'Xalay Dhalay', waxa uu tusinayaa aragtiyo heshiis bulsho oo qiimo leh. Mabaadiida tiirdhexaadka u ah Xalay Dhalay, oo ah wada hadal furan, kaqaybqaadasho bulsho, iyo go'aanno gorgortan lagu gaaro, waxa ay hagi karaan tayaynta hababka Caddaladda Kumeelgaarka ah, oo la jaan qaadaya dhaqanka iyo caadooyinka bulsho qabiili ah.

Marka loo fiirsado sida odayaashu isu u yimaaddaan, iyaga oo ka shaqaynaya xallinta tabashooyinka, si wadajir ahna u soo dhiraandhirrinaya heshiis rasmi ah, waxa cad in hindisayaasha Caddaladda Kumeelgaarka ahi hab-dhaqankaas kala bixi karaan tusaalayaal dhiirrigelin leh. Hoggaanka dhaqanka waxa la gudboon in ay ku mashquulaan qeexidda qaab-dhismeedka sharci ee geeddi socodka Kumeelgaarka ah. Sida uu sheegay Özerdem et al. (2021, p. 419), "In lagu mashquulo habka nabadaynta maxalliga ah, iyada oo xooggaga dhaqankuna qayb ka yihiin, taasi waxa ay sababaysaa in kooxaha argagixisada laga faro maroojiyo hubkooda ugu halisaysan, iyada oo la  burinaayo dooddooda ah in dowladnimadu halis ku tahay jiritaankooda, madaxbanananidooda iyo sumcaddooda koox ahaaneed."

### *5.4.4 Isku xirka Dhaqannada iyo Doorka Tignoolajiyadda Casriga Ah*

Hoggaamiye-dhaqameedka, oo ay ku jiraan duqaytida iyo dumarku, waa saldhigga iyo gunta aqoonta dhaqanka. Mboya (1970) waxa uu ka soo dhimbiil-qaadanayaa habkaas, waxaanu tilmaamayaa goonninimada ahaanshaha isirka Soomaaliyeed. Khubarada waxa la gudboon in ay qeexaan hannaan dibucurasho, oo ku qotoma ahaanshaha isirka. Marka laga yimaaddo qaabdhismeedka dhaqanka, tignoolajiyada soo ifbaxday ayaa muhiim u ah qaabaynta doodo iyo sheekooyin cusub. Safraha nabadda ayaa adeegsan kara baraha warbaahinta bulshada, si ay bulshada ugu sheegaan fariinta nabadda iyo dibuheshiisiinta. Ururrada matala bulshada rayidka ah ayaa iyagu awood u leh helitaanka sancooyinka cusub ee warbaahinta, taas oo u ogolaanaysa in ay xoguhu dhallinyarada gaaraan, una abuuraan doodo nabadeed oo xoogga saaraaya waxa ay ficil ahaan ka dhigantahay ahaanshaha Soomaalinimadu.

# 5. Talabixinno

Nabarrada ay reebtay xasiloonidarrada muddada-dheer soo jirtay ee Soomaaliya, ee ku suntan dagaallada riiqdoodu dheeraatay iyo kala daadashadii dowladnimadu, waxa ay qasabtay baahi loo qabo in la helo xayndaab-hawleed istratiiji ah oo loo raaco caddaalad bulsho oo ku meelgaar ah, dibuheshiisiin bulsho iyo dibudhiska waddanka. Qorshaha daraasaddan oo soo ban dhigaaya xalal u gaar ah dhibaatooyinka gaarka ah ee xaaladda Soomaaliya, waxa uu ka soo dhimbiil-qaadanayaa istiraatijiyado loo raacay xasarado ka dhex dhacay bulshooyin leh qaabdhismeed qabiili oo la mid ah kan Soomaalida.

Warbixinta diraasaddani waxa ay ku doodaysaa, haddii si taxadar leh loo raaco khariiraddan mushkiladda abbaaraysa,waxa ay Soomaaliya gelaysaa hayaan baaxaddiisa leh oo lagu beegsanaayo nabad waarta, midnimo bulsho iyo caddaalad. Hannaankan oo ah mid ku jaango'an xaaladda Soomaaliya, isla markaana ay hagayaan istaraatiijiyado wax-ku-ool ah, oo lagu raadinaayo caddaalad bulsho oo ku saabsan Kumeelgaarka ah, taas oo ku aroorta dhaqan Afrikaan, ayay muuqataa in ay awood u leedahay in ay ummadda ku hoggaamiso mustaqbal ku tilmaaman isfaham bulsho, oo badhaadhe leh.

Haddaba, si loo xaqiijiyo riyada ah Soomaaliya ku naalloonaysa nabad waarta, deganaansho iyo mustaqbal baraare leh, waxa lama huraan ah, in si micno leh, oo ku salaysan dareen iyo tudhaale loo wajaho bogaggii madoobaa ee taariikhda waddanka. Qaadashada hannaan caddaaladeed bulsho oo ku saabsan Kumeelgaarka ah, kaas oo mudnaanta siinaaya dibuheshiisiinta iyo ciqaab-marinta dembiilayaashaba, waxa ay jidka u xaaraysaa in uu waddanku si dhab ah uga gudbo marxaladihii madoobaa ee murugada badnaa, kuwaas oo caqabad weyn ku ahaa horumarka iyo dibudhiska dalku higsanayo, loona dhaqaaqo dhinaca mustaqbal rejo leh oo ifaya.

1. **Fahmidda Tabashooyinka Murgay:** ayaa aad muhim ugu ah in la aqoonsado tabashooyinka jira sida arrimaha isku murgay ee ka dhex jira beelaha Soomaaliyeed. Waxa lama huraan ah in la abuuro farsamooyin caddaladeed oo loo raaco fahanka iyo kala saaridda qaybaha kala duwan ee bulshada. In Sidaas la yeelaa waxa ay qiraysaa kala duwanaanshaha dabciga tabashooyinka badan ee jira, waxaanay xaqiijinaysaa in qayb kasta oo bulshada ka mid ah wax laga qabto baahideeda u gaar ka ah.

2. **Udhammaanshaha iyo Matalaadda:** waa in casharro la gala baxo istiraatijiyadaha jira si qaybaha la takooro ee bulshada looga qaybgeliyo hawlaha geeddisocodka dibuheshiisiinta. Waa in laga qaybgeliyo hawlaha socda kooxaha inta badan taariikh ahaan loo duudsiyo, sida haweenka, dhallinyarada, dadka la tunjileecsado/laga tirada badan yahay, barakacayaasha, qaxoontiga iyo qurbajoogta. Waa in laga faa'iidaysto talooyinka dadweynaha, kaqaybgalka qaybaha ka la duwan ee bulshada rayidka ah, wacyigelinta loo adeegsado warbaahinta, iyo dadaallada looga jeedo kobcinta aqoonta bulshada, si loo adkeeyo midnimada iyo kalsoonida dadka Soomaaliyeed.

3. **Dhammaystirnaanta Caddaladda Kumeelgaarka ah:** waa in la qaato istaraatijiyad dhammaystiran, taas oo ay ku jiraan qaabab kala geddisan oo ka mid ah hannaanka Caddaladda Kumeelgaarka ah, sida hindisayaal looga golleeyahay ka gun gaadhista runta, qaadista dacwadaha, magdhowyada, dibuhabaynta hay'adaha dowladda, iyo xoojint dadaallada dibuheshiisiinta. Waa in la garowsado xaqiiqada ah in aanu hal qaab oo caddaaladeed ku wada habboonayn tabashooyinka badan ee jira, maadaama taariikhda Soomaaliya ay ka buuxaan waxyaabo murugsan, oo u baahan jawaabcelin dhinacyo badan taabanaysa.

4. **Iswaafajinta Sharciyada waddanka lagaga dhaqmo:** waa in la isku dhafo hababka jira ee caddaaladda ku salaysan dhaqanka iyo sharciyada dowladda ee rasmiga ah. Waa in la aqoonsado wadajirka xeerarka ku qotoma shareecada islaamka, xeer dhaqameedka iyo xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Waa in la isku dhafo ilahaas kala geddisan oo dhan, iyada oo la ixtiraamaayo kala duwanaanshaha dhaqanka, is la markaasna la dhawrayo mabaadiida caalamiga ah ee u taagan ilaalinta karaamada iyo sinnaanta aadanaha guud ahaan.

5. **Xaqiijinta dhaqanka islaxisaabtanka:** waa in la abuuro habab loo raaco la xisaabtanka kuwa ku kaca xadgudubyo ka dhan ah bini-aadantinimada. Kuwa dembiyada waaweyn galay waa in laga hor istaago in ay xilal dadweyne qabtaan. Taasi waxa ay xoojinaysaa dhaqanka islaxisaabtanka, waxaanay keenaysaa in aanay kuwo kale ku dhiirran xadgudubyo noocaas ah, tanina waxa ay astaan u tahay sida ay xaqiijinta caddaaladdu uga go'antahay dadka masuulka ah.

6. **Dibuheshiisiin salka laga unko:** mudnaanta waa in la siiyo sidii dadaallada dibuheshiisiinta loo gaarsiin lahaa heer deegaan, iyada oo la aqoonsanaayo xaqiiqada ah in saamaynta colaadaha Soomaalidu ay u dhaadhaceen qaybaha u yar ee deegaan kasta iyo bulsho kasta. Ma aha uun in la heshiisiiyo qabilooyinka iyo kooxaha guud, bal se waa in mid walba dhexdeeda hoos loo eego oo dhexdeeda la heshiisiiyo. Dibuheshiisiinta dhabta ahi waa in ay ka soo abuuranto, oo ka dhaqan gasho deegaanka ugu hooseeya.

7. **Arrimaha Debedda:** fahanka saameynta arrimaha debeddu ku leeyihiin xasaradaha gudaha. Waa in wax laga qabto siyaasadda juqraafiyeed ee gobolka ka jirta iyo faragelinta debedda ka imanaysa, ee uga sii daraysa mashaakilka Soomaaliya. Wacyiga xaqiiqada taas ah loo yeeshaa waxa uu sahlayaa in la abuuro istiraatijiyad wax-ku-ool ah oo lagu khafiifinayo saamaynta debedda.

8. **Xoojinta Garsoorka:** waa in la xoojiyo tayada, kalsoonida, iyo helitaanka adeegyada Garsoorka Soomaaliyeed. Waa in la maalgeliyo tababarrada, kaabayaasha garsoorka iyo xoojinta aqoonta sharciyada ku saabsan, si loo adkeeyo nidaamka caddaaladda dowladda. Tani waxa ay xaqiijinaysaa in hawlaha caddaaladda loo maamulo si hufan oo xaqsoor ah.

9. **Ka ista nidaamyada qaybiya bulshada:** waa in la beddelo hababka jira ee xoojiya kala qaybsanaanta bulshada, kuwaas oo sii joogtaynaya tafaraaruqa qabiillada, taas oo caqabad ku ah dadaallada dhabta ah ee dibuheshiisiinta. Baabiinta hannaanka 4.5 ee oo ah nidaam ku dhisan awood-qaybsiga beelaha ayaa tiirdhexaad u ah adkaynta udhammaanshaha qaybaha kala duwan ee bulshada, sinnaanta, iyo xasiloonida waddanka.

10. **Iskudhafka dadadaallada nabadaynta iyo dowlad-dhisidda:** hawlaha Caddaladda Kumeelgaarka ah ku saabsan ee socda, waa in la garab wado iskudhafka dadaallada nabadaynta iyo dowlad-dhiska. Waa in dibuhabayn lagu sameeyo hay'adaha amniga, in dastuurka dib-u-eegid lagu sameeyo, is la markaana, la diyaariyo qabanqaabo ku saabsan doorashooyinka, hawlahaas oo la garab wado horumarka guud ahaaneed ee dalka ka jira.

# 6. Tixraacyo


A Dersso, S. (2017, October 19). Lecture: The State of Transitional Justice in Africa—Between wide application and deep contestation. State of Transitional Justice in Africa. Continental Forum, Johannesburg, South Africa.

Abdile, M. (2012). Customary Dispute Resolution in Somalia. African Conflict and Peace-building Review, 2(1), 87–110. https://doi.org/10.2979/africonfpeacrevi.2.1.87

Bar-Tal, D., & Bennick, G. (2004). The nature of reconciliation as an outcome and as a process. In Y. Bar-Siman-Tov (Ed.), From conflict resolution to reconciliation (pp. 11-33). Oxford University Press.

Boege, V., Brown, M., Clements, K. P., & Nolan, A. (2008). On hybrid political orders and emerging states: What is failing-state building? Conflict, Security & Development, 8(2), 1-21.

Brown, S. (2012). The National Accord, impunity, and the fragile peace in Kenya. In Transitional Justice and Peace-building on the Ground (pp. 238–254). Routledge.

Caroli, P. (2022). Transitional justice in Italy and the crimes of Fascism and Nazism. Routledge.

Haslem, B. (2022). TikTok as a Digital Activism Space: Social Justice Under Algorithmic Control. Old Dominion University.

Human Rights Watch. (2021). Somalia: Events of 2021. In World Report 2022. https://www.hrw.org/world-report/2022/country-chapters/somalia

Kane, A. (2000). Reconstructing Culture in Historical Explanation: Narratives as Cultural Structure and Practice. History and Theory, 39(3), 311–330.

Lepistö, R. S., Gisselquist, R. M., & Ojala, J. (2015). 'Embedded'Assistance: Finn Church Aid's Secondment in Somalia. International Peacekeeping, 22(4), 354–371.

Matandela, M. (2020). Addressing gender justice and colonialism through transitional justice in Africa.

Mboya, T. (1970). The Challenge of Nationhood: A Collection of Speeches and Writings. Praeger Publishers.

McEvoy, K., & McConnachie, K. (2013). Victims and transitional justice: Voice, agency and blame. Social & Legal Studies, 22(4), 489–513.

Menkhaus, K. (2014). State failure, state-building, and prospects for a "functional failed state" in Somalia. The Annals of the American Academy of Political and Social Science, 656(1), 154–172.

Muhammed, M. H. (2018). Future Possibilities for Transitional Justice in Somalia. Ü Niversitepark BüLten/Universitepark Bulletin , 7, 108–119.

Njoku, R. C. (2013). The History of Somalia: Greenwood histories of the modern nations. Santa Barbara: Abc-Clio.

Özerdem, A., Akgül-Açıkmeşe, S., & Liebenberg, I. (2021). Routledge Handbook of Conflict Response and Leadership in Africa (1st ed.). Routledge. https://doi.org/10.4324/9780429318603

Pentikäinen, A., & Hill, O. T. (2021). Clan Elders and Traditional Reconciliation in Somalia. In A. Özerdem, S. Akgül-Açıkmeşe, & I. Liebenberg, Routledge Handbook of Conflict Response and Leadership in Africa (1st ed., pp. 261–274). Routledge. https://doi.org/10.4324/9780429318603-23

Roberts, R. S. (2020). How 'transitional justice colonized South Africa's TRC. Modern Languages Open.

Secretary-General, U. (2004). The rule of law and transitional justice in conflict and post-conflict societies: Report of the Secretary-General. https://peacekeeping.un.org/en/report-of-secretary-general-rule-of-law-and-transitional-justice-conflict-and-post-conflict

Somalia Stability Fund, (2021). Assessing the Scope and Parameters for Transitional Justice in Somalia. Somalia Stability Fund. https://stabilityfund.so/resource/assessing-the-scope-and-parameters-for-transitional-justice-in-somalia/

Teitel, R. G. (2005). Transitional Justice. In The Oxford Handbook of Genocide Studies (pp. 417-432). Oxford University Press.

Teitel, R. G. (2015). Globalizing transitional justice: Contemporary essays. Oxford University Press.

HERITAGE
INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org